

**WARAR TURJUBAANIDDA DAN  
DHAMMAYSIGA KU SAABSAN  
OO LOGU TALAGALAY DADKA  
WADDANKA U SOO GUUREY**

**Qoraallada Wasaaradda Shaqada (Työministeriön esitteitä)  
2004  
[www.mol.fi/migration](http://www.mol.fi/migration)**

Qoraalkan waxaa si wadajir ah u dejiyey Wasaaradda Shaqada, Lingua Nordica Oy, Xarunta Turjubaanada Dan Dhammaysiga ee Helsinki iyo Nawaaxigeeda (Helsingin seudun asioimistulkkikeskus), Xarunta Turjubaanada ee Keski-Suomi (Keski-Suomen tulkkikeskus), Xarunta Turjubaanada ee Pirkanmaa (Pirkanmaan tulkkikeskus), Adeegyada Turjubaanada ee Pohjois-Suomi (Pohjois-Suomen tulkkipalvelu) iyo Xarunta Turjubaanada ee Turku iyo Nawaaxigeeda (Turun seudun tulkkikeskus).

**Buggani wuxuu si kooban uga sheekaynayaa turjubaanidda dan dhammaysiga iyo turjubaanka shaqadiisa, dadka waddanka u soo guureyna waxaa loogu sheegayaa siday tahay in loo hadlo marka turjubaanka la isticimaalayo. Buuggan waxaad ka heleysaa bogga internetka ee Wasaaradda Shaqada, cinwaanka: [www.mol.fi/migration](http://www.mol.fi/migration)**

## **AQOON GUUD OO KU SAABSAN TURJUBAANIDDA DAN DHAMMAYSIGA**

Turjubaanidda waxaa loo baahdaa, haddii aanay jirin luuqad laysku afgarto. Turjubaaniddu waxay caawinaysaa in hadal lays dhaafsado oo lays fahmo, xitaa iyadoo lagu hadlo luuqado iyo dhaqamo kala duwan.

Turjubaanidda dan dhammaysiga waxaa loola jeedaa wadahadlka dhexmara qof macaamiil ah iyo shaqaalaha maamulka, tusaale ahaan turjubaanidda waraysiga ama interfiiyuuga. Turjubaanidda dan dhammaysiga waxaa loo samayn karaa habka hadalka isdaba socda (konsekutiivisesti), taas oo macneheedu yahay in markuu qofku hadlo ka dib hadalkiisa loo turjumayo luuqadda kale ama turjubaaniddu waxay noqon kartaa isku mar (simultaanisesti), taas oo macneheedu yahay qofka hadalkiisa la turjumayo isagoo hadlaya ayuu turjubaanku ka dul hadlayaa oo isla markiiba hadalkiisa turjumayaa. Turjubaanidda dan dhammaysigu waxay ka dhici kartaa iyadoo isku meel la joogo ama waxay noqon kartaa mid laysu turjumayo iyadoo la kaashanayo telefoon ama qalabka turjubaanidda ee fiidyowga.

Turjubaanka luuqadda oo si fiican u yaqaan waxaa u dheer, inuu warka si fiican u gudbin yaqaan, dhaqankana aqoon fiican u leeyahay. Turjubaanadu xirfadooda way soo barten iyagoo soo qaatay shahaadada xirfadda turjubaanidda dan dhammaysiga ama jaamacad bay turjubaanidda uga soo baxeen.

Shaqada turjubaanku waa in, meesha arrintu ka socoto hadalka lagaga hadlo uu turjumo. Turjubaanku ma aha qof caawinaya ama u hadlaya qofka shaqaalaha maamulka iyo qofka waddanka u soo

guurey ee macaamiisha ah toona. Dadka arrinta laga hadlayaa khusayso ama qaraabada ah ama saaxiibada ah iyo carruurto, si sharci ahaan ah turjubaan ugama noqon karaan arrintaas.

Turjubaanadu waxay shaqadooda darteed dhawraan xeerarka xirfadda turjubaanidda u degsan iyo waxyaabaha turjubaanada la faro. Xeerarka ugu muhiimsan waa:

- Turjubaanka waxaa waajib ku ah inuu wuxuu og yahay cidna u sheegin.
- Markay turjubaanid jirto turjubaanku waa dhexdhexaad, arrintana bannaankuu ka yahay. Turjubaanka fikradihiisa iyo aragtidiisu saamayn kuma yeelanayaan shaqadiisa.
- Turjubaanku kama turjumi karo arrin saamaysa ehelkiisa ama saaxiibadiisa. Sababtoo ah turjubaanku arrinta bannaanka kama aha, sidaa darteedna ma turjumi karo.
- Turjubaanku hadalka la yiraahdo oo dhan buu turjumaa. Hadalka wax kuma kordhiyo waxna kama tago.
- Inta turjubaanidda lagu jiro turjubaanku hawl kale oo aan turjubaanidda ahayn ma qabto.

### **TURJUBAANIDDA SIDAN BAAD YEELEYSAA:**

- Hadal cad ku hadal.
- Turjubaanka ha la hadlin. Turjubaanka lama xaajoneysid ee qofka shaqaalaha ah baad arrintaada kala hadlaysaa. Tixgeli, turjubaaniddu waxay u dhacaysaa sidii wax turjubaanku iska hadlayo oo kale, oo ah qaabka *aniga* (*minä* –muoto).
- Turjubaanka sii wakhti uu hadalkaaga ku turjumo.
- Turjubaanku hadalkoo dhan wuu turjumayaa, sidaa darteed waxaad rabto in la turjumo ookeliya sheeg.

Shaqaalaha maamulka iyo turjubaanku wakhti go'an bay meesha joogaan, sidaa darteed waa inaad ilaalisaa wakhtiyada lagula ballamo.